

Talooyinka U Diyargarowga Imtixaanka ee ku Socda Waalidka iyo Bareyaasha

Talooyinka soo socda waalidka iyo bareyaasha waxay ardada ku caawinayaan inay u diyaargarooaban qiimaynada guudahaaneed ee gobolka.

Diyaargarowga Guud

- Ardadu waa inay qaataan maaddooyin ka turjumaya Heerarka Waxbarashada ee Minnesota. Dugsiyada badankood sidoo kale waxay sameeyaan fursado waxbarasho habboon oo ay siiyaan ardada halista ugu jira in aanay ku guulaysantqiimaynta guud.
- La wadaaga caruurtiinna xiisaha iyo muhiimadda akhriska, qorista, xisaabta iyo sayniska.
- Siiya ardayda aaga waxbarasho ee guriga.
- Ku dhiirigeli ardayda ka qeybqaadashada dhaqan barasho wanaagsan. Ardayda waa in ay meel ku qorsheeyaan shaqada guri maalin walba.
- Iska habsada inay ardadu haystaan fursadda ay korka ka bartaan qaabka imtixaamka loo diyaariyay.
 - Sheeyada tusaalayaasha ku caawiya ardayda in ay ku bartaan qaabka imtixaanka.
 - Casharada ardayga ee imtixaanada onleenka waxay ku siinayaan warbixinta sida loo isticmaalo qalabka onleenka iyo sharaxaada jaheynta iyo noocyada sheeyada.
 - [Gal qeybta bogga tusaalooyinka sheega ee websaydka MDE wixii warbixin ah ee gelitaanka tusaalooyinka sheega iyo casharada ardaygao.](#) (Gal qeybta Districts, Schools and Educators > Teaching and Learning > Statewide Testing > Student Resources.)
- Hubi in ardayda ay hurdo wanaagsan helaan iyo cunto qurac nafaqo ah imtixaanka ka hor.
- Ku dhiirogeli ardayda inay ka jawaabaan su'aalaha imtixaanka oo idil.

Imtixaammada Akhriska

- Ardada u akhriya iyo ku dhiirrigaliya inay idinka wax idiin akhriyaan.
- Ardada ku dhiirrigaliya inay ka shaqeeyaan halxiraalayasha erayada leh iyo erayada la isku tixda aad aadiyo.
- Ardada ku dhiirrigaliya inay maalin kasta akhriyaan wargayska maalmeed iyo wargaysyada macluumaadka caamka leh.
- Kala sheekaysta waxa ku saabsan dhacdooyinka wararka iyo guud ahaan wargaysyada aay daneynayan ee malmeedlaha.

Imtixaammada Xisaabta

- Ardada ku dhiirrigaliya inay maalinka xisaabta adeegsadaan. Laylisyo ku samayn karaan iyo abuurtaan misaaniyadda cuntada, sharaxaan qariradoa iyo garaafyada ku yaalla mowduucyada wargayska iyo maqaaladaha, cuntada qaybqayb u kala qaybiyaan, mastaradaha u isticmaalaan inay shayada ku cabbiraan, cabbiraan miisaanka caddadka hab-diyaarinta cuntada ama sida qiimayasha laysku daro marka wax la soo adeegsanayo.
- La cayaartaan cayaaraha leh tirooyin ama xisaabid.
- Ardada ku dhiirrigaliya inay isku xiraan waxa ay fasalka xisaabta ka bartaan inay ku dabbaqaan waxa ay jecelyihiin, fasallada kale, iyo noolasha maalin kasta.

Imtixaammada Sayniska

- Maqaallada sayniska laga soo adeegsanayo qoraallada cusyb si lagu tuso in sayniska uu yahay wax socda, hawshoodana muuqata.
- Ardada loo jeediyo xirfadaha weydiimada ayadoo laga qaybqaadanayo tartamada, carwooyinka iyo hawlaha kale.
- Sayniska laga indha-indheeyo fasalka dibaddiisa – xaruumaha bay’adda, beerta dhoollatusadka xoolaha iyo maftaxyada sayniska.

Isticmaalidda Aaladaha Xisaabinta

Baraha fasalka canuggiina ka wareysataan si aad ku ogaataan sida caadi ahaan aaladda xisaabinta looga isticmaalo fasalka. Ardadu ma ay wadaagi karaan ardada kale aaladaha xisaabinta marka lagu jiro qiimaynta Minnesota ama ay isticmaalaan boog-tilmaamaha aalado kale. Dugsiga canugaaga wuxuu ka haystaa macluumaada dheeraada waxa ku saabsan marka iyo sida loogu isticmaalayo imtixaamka aaladaha xisaabinta.

Wixii macluumaad dheeraad ah, la soo xariir:

Statewide Testing
mde.testing@state.mn.us